



Information till föräldrar och vårdnadshavare

Soo jeedin ku saabsan isbeddel lagu sameeyo iskuulka si iskuullada Trollhättan u noqdaan kuwo loo siman yahay

Dhammaan carruurta iyo ardaydu waxay xaq u leeyihii inay ku sugnaadaan duruufo isu dhigma si ay u gaaraan hadafka ay ka leeyihii waxbarashada iskuulka. Waxbarashada oo lagu guulaysto waxay shuruud muhiim ah u tahay in qof kasta horumar ka gaaro nolosha, uu helo shaqo, masruuf iyo nolol wanaagsan. Laakiin Trollhättan - sida magaaloyin kale oo badan – waxay kala kala qoqobnaantu keentay in carruurta iyo ardayda ay haystaan fursado kala duwan oo ay ku guulaystaan, iyadoo ay ku xiran tahay waaxda degmo ee qofku kusoo koray, ama iskuul qofku ka dhigto.

Waxay siyaasiyiinta guddiga waxbarashadu maamulka u igmadeen shaqadaas bishii juun 2019. Waxay arrintu ku saabsanayd in la keeno hindiseyaal yarayn kara saamaynta kala qoqobnaanta oo duruufaha carruurta iyo ardayda laga dhigo kuwo isku dhigma. Maamulku wuxuu soo saaray hindiseyaal ku saabsan tillaaboojin noocaas ah, laakiin sidoo kale waxay soo saareen hindiseyaal keenaya in hantida iskuulka badankeeda la geliyo waxbarashada, meeshii la gelin lahaa kharashaadka dhismayaasha iskuullada. Hindisuhu wuxuu taageero ka helayaa sharciga iskuulka, manhajyada waxbarasho, hadafka golaha degmada iyo guddiga maamulka, iyo sidoo kale fikarka guud ee maamulka waxbarashada.

Talo soo jeedinta (hindise-yaasha) lagu soo qaaday baaritaanka waa kuwaan soo socda

- Kronan fasallada F-9 waxaa loo beddelayaa Iskuul ka kooban F-3 wixii ka bilowda bisha agosto 2021. Isugayn qiyaastii 210 arday oo dhigata fasallada 4-9 waxaa boosas laga siinayaa iskuulo ku yaal bariga iyo galbeedka Trollhättan (Lyrfågelskolan, Stavreskolan, Strömlundsskolan, Paradisskolan, Skogshöjdens skola). Markii loo qaybinayo waxaa la eegayaa baahida iyo duruufaha shaqsiyeed ee ardayda, laakiin waxaa sidoo kale la eegayaa suurtagalnimada inay iskuulladu qaabili karaan arday ka badan kuwa haddaba dhigta iskuullada. Iskuulka oo u fidinaya ardayda in lasoo qaado (skolskjuts) baa waxay keenaysaa inay iskuulka cusub ku yimaadaan qiyaastii 20-25 daqiiko.
 - Hindisuhu wuxuu yarayn lahaa kala qoqobnaanta ka jirta iskuullada oo wuxuu kor u qaadi lahaa isdhexgalka ardayda Trollhättan ku sugar. Arday badan baa waxay

fursad u heli lahaayeen inay dhigtaan iskuul arday badan oo saaxiibadoo ah luuqadooda hooyo iswiidhish tahay.

- Frälsegårdsskolan fasallada F-6 waa la xiraya laga bilaabo agosto 2021. Ardayda qiyaastii 110 arday ah ee dhigata fasallada F-3 waxaa boosas gacanta koowaad laga siinayaa Kronan, oo ardayda qiyaastii 60 arday ah ee dhigata fasallada 4-6 waxaa boosas laga siinayaa iskuullo ku yaal bariga iyo galbeedka Trollhättan (Lyrfågelskolan, Stavreskolan, Strömlundsskolan, Paradisskolan, Skogshöjdens skola). U kala qaybinta waxaa laga eegayaa baahida ardayda iyo duruufahooda, laakiin waxaa sidoo la eegayaa inay suurtagal u tahay iskuulladu inay qaabilaan arday ka badan ardaydii horay u dhigan jirtay iskuullada. Iskuulka oo u fidinaya ardayda in lasoo qaado (skolskjuts) baa waxay keenaysaa inay iskuulka cusub ku yimaadaan qiyaastii 20-25 daqiqiyo.
 - Hindisuhu wuxuu yaraynayaa kala qoqobnaanta iskuullada oo qor u qaadi lahaa isdhexgalika ardayda ku sugaran Trollhättan. Arday badan baa waxay fursad u heli lahaayeen inay dhigtaan iskuul arday badan oo saaxiibadoo ah luuqadooda hooyo iswiidhish tahay.
- Iskuulka Velanda F-6 waa la xiraya laga bilaabo agosto 2021. Ardayda qiyaastii 130 arday ah waxay gacanta koowaad boos ka heli doonaan iskuulka cusub ee Sylteskolan.
 - Iskuulka Velanda waa iskuul yar oo ay sugayo dib u habayn kharash badan ama dhisid cusub. Iskuulka cusub ee Sylteskolan waxaa ka bannaan boos dhismihiiisa casriga ah oo hindisuhu wuxuu suurtagelinayaa in la dhimo kharashaadka dhismayaasha ku baxa, taasoo faa'ido u ah waxbarashada. Iskuulka oo u fidinaya ardayda in lasoo qaado (skolskjuts) baa waxay keenaysaa inay Sylteskolan ku yimaadaan in ka yar 15 daqiqiyo. Hindisuhu wuxuu yarayn lahaa kala qoqobnaanta iskuullada ka jirta oo kor usoo qaadi lahaa is dhexgalika ardayda ku sugaran Trollhättan.
- Välkomsten (ka shaqeeya qaabilaadda ardayda waddanka ku cusub) waxaa laga rarayaan Lyrfågelskolan, laga bilaabo agosto 2021.
 - Guuritaanku wuxuu Lyrfågelskolan u suurtagelinayaa inay qaabilaan arday badan. Flytten gör det möjligt för Lyrfågelskolan att ta emot fler elever.
- Shuruuc cusub oo ku saabsan sida ardayda boos looga siinayo dugsiyada hoose dhexe ee degmada. Gacanta koowaad waxaa la raacayaa rabitaanka (waalidka) qofka sharchiyan ilmaha ka mas'uulka ah (doorashada iskuulka), iyo gacanta labaad oo ardaygu xaq u leeyahay inuu dhigto iskuul u dhow gurigiisa.
 - Isbeddelku wuxuu saamayn ku yeelanayaa ugu horrayn ardayda maantay ka tirsan Kronan iyo Frälsegårdsskolan, oo waxay ka dhigan tahay in ardaydaas laga siinayo boosas iskuullo ku yaal xaafado kale.
- Shuruucda iskuul usoo qaadidda waxaa wax ka beddel loogu samaynayaa ardayda fasallada 7-9, si ay xaq ugu yeeshaan in iskuulka loo qaado haddii masaafada iskuulku u jiro ay tahay 3 km ama ka badan. Horay waxaa loogu baahnaan jiray masaafaa jirta ugu yaraan 4 km.
- Isbeddel lagu samaynayo shuruucda carruurta xannaanada looga qoro, taasoo suurtagelinaya in ilmo badan wakhtiga xannaanada loo badiyo, haddii taas ay caawinayso horumarkooda luuqadeed.
 - Waxqabadka xilliga hore waa muhiim oo carruur badan waxay xannaanadu u tahay meesha keliya ee ay ku isticmaalaan luuqadda iswiidhishka.
- Maamulka waxbarashadu wuxuu baarayaa suurtaglinimada in xannaanada stallet loo raro dhismaha Frälsegårdsskolan.
 - Dhismaha xannaanada xaaladiisu way xun tahay. Haddii loo raro Frälsegårdsskolan dhismihiiisa waxay taas keenaysaa in maamulka ka baaqsado kharashaad badan oo ku bixi lahaa dibu habayn iyo dhisid cusub.

- Maamulka waxbarashadu wuxuubaarayaa suurtagalnimada in hawlahaa Hälltorpsskolan loo raro Strömlundsskolan F-6 oo loo oggolaado xannaanada Mioäpplet inay la wareegto dhismaha.
 - Hälltorpskolan waa iskuul aad u yar oo qiyaastii 100 arday dhigtaan, taasoo keenaysa inay adag tahay in la abaabulo dhaqaale ahaan iyo waxbarasho ahaanba. Waxaa aagga ka jira baahi soo siyaadaya oo loo qabo boosas xannaano, oo haddii Mioäpplet dhisme wayn la helo arday badan baa lagu qaabili karaa.
- Maamulka waxabarashadu wuxuubaarayaa suurtagalnimada inuu bilaabo bas xannaano oo suurtageliya in la kordhiyo isdhexgalka oo lagu horumariyo waxbarashada bannaanka lagu qaato ee degmada. Basaska waxay sidoo kale suurtagelin lahaayeen in si dhaqso ah loo haqabtiro baahida boosaska xannaanada qaab la waafajin karo hadba xaaladda taagan.

Maamulka waxbarashadu wuxuu rabaa inuu baaro hindise suurtagelinaya in ardayda qaarkood wakhti intaa ka badan ku qaataan dugsiga xilliga firaaqada. Wuxuu keenay waa in waxbarashada dugsiga xilliga firaaqada caawin lahayd ardayda qaarkood horumarkooda luuqadeed iyo horumarkooda bulshaynimo.

Asalka ilmaha iyo ardayda waxay saamayn ku yeelataa natijadiisa iskuulka

Cilmibaaris ayaa muujinaysa in ardayga asalkiisa xag bulsho iyo xag dhaqaale noloshiisa ay micno weyn u sameynayso sidii ay u gaari lahaayeen hadafkii waxbarasho ee iskuulka . Ilmaha waalidiintood leeyihii waxbarasho sare dhaqaalahaa soo galana uu sareeyo waxay kaga hor guuleysan ogyihii iskuulka ilmaha aqoonta waalidkood iyo dhaqaalahaa soo galaba ay hooseeyaan.

Iskuulka Trollhättan wuu kala qoqoban yahay

Saddexdii ilmoodba mid ka mid ah ilmaha ku nool Trollhättan wuxuu asal ahaan ka soo jeedaa waddan kale balse kala qoqobaanta iskuulku waxay keentey in ardeyda asal ahaan ajnabiga ahi boqolkii ba boqol ku dhawaadaan dhaww iskuul oo ku yaal magaalada. Iskuullo qayb ahaan ay ku badan yihiin ardayda asal ahaan ajnabiga ahi waxaa ku adag inay helaan macalimiin rasmiya. Sidaas oo kale waxaa jira iskuullo kale oo ku dhawaad ardeyda oo dhami iswiidish yihiin, waalidkoodna leeyihii aqoon sare dhaqaalahaa soo galana uu sareeyo. Maanta macalimiinta rasmiga ahi waxay aad ugu yar yihiin iskuullada ay dhigtaan ardeyda ugu baahida badan.

Maalgelin waa la sameeyey laakiin ma gaarin meeshii la rabay

Maamulka waxbarashadu waxay sannado badan ka shaqeeyayeen sidii ay u yareyn lahaayeen kala qoqobaanta iskuulada iyo sidii ay kor ugu qaadil ahaayeen natijada arda yda. Maalgelintaas waxaa ka mid ah in dhaqaale la geliyo, shaqaalahaa oo la kordhiyo , kaalmada hey'edda iskuulkaadka iyo maalgelin wax lagu barayo shaqaalahaa. Sidaas oo ay tahay natijada ardayda ma siyaadin in ku filan.

Iskuullo isu-dhigma waa shardi marka la eego sharciga iskuulka

Sharciga iskuulka iyo kan waxbarashada dugsiyada dhexe iyo xannaanada waxaa ku qoran in iskuulaadku ay isu dhigmaan lana waafajiyo daruufaha iyo baahida ilmaha iyo ardayda. Iskuulka waxaa mas'uuliyad gaar ahi ka saaran tahay ilmaha iyo ardeyda sababo kala duwan awgeed, ay ku adagtahay inay meel ka gaaran waxbarashada. Waxaa loo baahan yahay in dawladda hoose iyo iskuulaadku ay siyaabo kala duwan u wada shaqeeyaan si ilmaha iyo ardeayda asalkooda iyo daruufahoodu kala duwan yihiin ay u helaan fursado isu dhigma si ay meel u gaaran uguna guuleystaan waxbarashadooda.

Kordhintaa isu dhigmidda iyo iskuullo waara

Haddii soo jeedintaas la meelmariyo waxaa la filanayaa in isu-dhigmidda waxbarashada Trollhättan ay kor u kacdo kala qoqobnaanta iskuuladuna ay yaraato. Ardey badan oo asalkooda xag bulsho iyo xag dhaqaale uusan wanaagsaneyn iyo ardeyda asal-ahaan ajnabiga ahi waxay heleyaan iskuulaad arday badan oo ay isku fasal yihiin ku nool yihiin duruuo wanaagsan xag bulsho iyo xag dhaqaaleba luuqadooda hooyana tahay iswiidish, taaso gacan ka geysaneysa in ardey badani ay meel ka gaaraan iskuulka. In la joojiyo iskuulada leh daaruufaha adag ee gaarka ah iyo iskuulada qayb ahaan yaryar waxay siinaysaa maamulka fursado badan oo ay hab waara isugu abaabulayaan ha ahaato dhanka shaqaalaha, kartida, dhaqaalaha iyo waxbaridda.

Wax badan baa dhiman

Iskuulka oo lagu guulaysto iyo waxbarashada oo la dhamaysto waxay kor u qaadaa fursadaha mustaqbalka ee dadka oo u keentaa nolol wanaagsan oo leh shaqo iyo masruuf, muhiim bayna u tahay Trollhättan oo dhan in da'yarta ku kora magaalada ay dareemaan inay mustaqbalka aaminaan oo ka qaybqaataan bulshada ay ka tirsan yihiin.

Tillaabooyinka lasoo jeediyay ma u ahan xal kama danbays ah dhibaatooyinka kala qoqobnaanta iyo isu dhigmidda dugsiyada Trollhättan laakiin talo soo jeedinta (hindise-yaasha) lagu soo qaaday baaritaankaan waa kuwo maamulku ku qiimeeyay inay muhimad gaar ah leeyihiin.

Maxaa dhacaya hadda?

Hindise-yaasha halkaan lagu soo qaaday waa hindise un, oo ma ahan kuwo horay go'aan looga gaaray. Waa siyaasiyiinta Guddiga waxbarashada kuwa go'aanka ka gaari kara. Waxaa qorshaysan in kulanka Guddiga waxbarashadu dhaco 27 oktoobar. Markaas waxay siyaasiyuuntu dooran karaan inay fuliyaan hal, dhowr ama dhammaan tillaabooyinka. Waxay sidoo kale dooran karaan inaysan fulin mid ka mid ah hindise-yaasha, ama inay Maamulka waxbarashada u igmadaan inay isbeddel ku sameeyaan hindise-yaasha hadda diyaarka ah, si ay ugu dib dhigtaan go'aanna uga gaaraan xilliga dayrta ama qaboobaha.

Wakhtiga qorshaha illaa laga gaarayo go'aanka guddiga waxbarashada

- 18 agosto : Shaqaalaha iskuulka, dugsiga xannaanada iyo dugsiga xilliga firaaqada waxay heli doonaan warbixin ku saabsan hindise-yaasha la soo jeediyay. Warbixin baa loo soo dirayaan waalidiinta oo la gelinayaan bogga internetka : www.trollhattan.se
- 19 agosto : Ardaydu waxay warbixin ka helayaan macalimiintooda.
- 27 oktoobar 2020 – Hindise-yaasha waxaa gudagelaya Guddiga waxbarashada

Wada hadal lala yeesho muwaadiniinta

Waxaan doonaynaa inaan maqalno fikradahaaga iyo aragtidaada inaad ka dhiibatid talo soo jeedinta aan soo bandhignay. Wuxaan soo diraynaa casumaad gaar ah oo lagagu casumayo kulamo wada hadal dhici doona bilowga sebtembar. Wuxaad markaas fursad u heli doontaa inaad su'aalo ka dhiibatid hindise-yaasha. Xanuunka corona iyo halista faafitaanka cudurka awgood dad badan inay kulanka ka qaybgalaan kuma casumi karno. Wuxaan sidaas darteed ka shaqaynanaa inaa helno qaabab kale, si aan anagoo adeegsanana farsamo (aalad) inaan wada hadal yeelano.

Wuxaad haddaba wixii su'aal ama aragti ah kusoo diri kartaa email: utbildning@trollhattan.se.

Waxa keenay baaritaanka

Waxay siyaasiyiinta Guddiga waxbarashada shaqaalaha maamulka u igmadeen inay dibu eegis ku sameeyaan abaabulka shaqada iskuullada degmada. Shaqada loo igmaday waxaa ka mid ahaa in la yareeyo tirada iskuullada degmada si loo abuu duruufo keenaya in lasii kordhiyo isu dhigmidda iskuullada Trollhättan. Maamulka waxa sidoo kale loo igmaday inay dibu eegis ku sameeyaan doorashada xorta ah ee iskuulka siday u dhacdo, iyo sida ardayda aan iskuul dooran boos looga siiyo iskuul.

Cilmi baaris arrintaa lagu sameeyay, iyo waxyaalo ay degmooyin kale sameeyeen si ay u yareeyaan kala qoqobnaanta iskuulka ka jirta baa waxay muujinaysaa inay suurtagal tahay in la fuliyo isbedello yaryar oo badan. In iskuullada la isku daro, ama in la xiro iskuullo waxay saamayn ku yeelan kartaa nolol maalmeedka dadka oo isbeddel ku keeni kartaa suurtagalnimada in lagu noolaado oo laga shaqeeyo xaafad ama mushtamac. Sidaas darteed waxay maamulku ka fiiirsadeen waxa uu ku xun yahay iyo waxa uu ku fiican yahay hindise kasta oo isku deynay inaan qaadno tillaabootay keenaya saamayn wayn oo ay muhiim tahay in la fuliyo si carruur iyo arday badan oo Trollhättan ku nool si fiican ugu guulaystaan iskuulka.

Kasii akhri

Baaritaankii Maamulka waxbarashadu sameeyay hindise kasta oo ka mid ah oo wata daliil (sababayn) dheer iyo sharaxaada saamaynta ka dhalan karta baa jira. Haddii aad rabtid inaad

akhrisid baaritaanka oo dhan waxaad kasoo degsan kartaa bogga degmada:
www.trollhattan.se/likvardigskola

Halkaas waxaan kusoo uruurin doonaa liis ay ku qoran yihiin su'aalaha caadiga ah iyo jawaabahooda. Wuxuu wixii su'aalo ku saabsan baaritaanka dhiibban kartaa adigoo email usoo diraya utbildning@trollhattan.se